

## **Nidaamka Catholic Health – Siyaasadda Xarumaha Daryeelka aad loogu Baahan yahay ee Gargaarka Daryeelka Caafimaadka**

Iyadoo ka duulaysa hawlgalkeeda, Catholic Health waxaa ka go’an inay adeegyo daryeel caafimaad ah siiso dhammaan bukaannada kolba sida ay lagama maarmaan u tahay daaweyntoodu.

Bukaannada u baahan gargaar maaliyaddeed ama ay si ku meelgaadh ah u hayso duruuf adag oo maaliyaddeed, Catholic Health waxay siinaysaa gargaaro dhawr ah iyo qaabab ay wax ku bixin karaa oo ay ku jiraan qiimaha daryeelka oo laga dhimo iyo daryeel kheyri ah, iyo sidoo kale qorsheyaal muddo dheer ama gaaban ah oo ay wax iskaga bixinayaan.

### **Yaa xaq u leh gargaarka daryeelka caafimaad?**

Catholic Health waxay qiimo dhimista gaadhsiinaysaa bukaannada aan ceymiska ku jirin ee la siiyo adeegyada daaweynta lagama maarmaanka ah. Xadiga qiimo dhimista ceymis la’aantu wuxuu ku saleysnaanayaa haggeyaasha Heerka Faqriga ee Federaalka (FPL) iyo hoos u dhaca heerka ee ku yimaad heerka dakhliga.

Maadaamaa adeega ugu muhiimsan ee CHS la siiyo shanta degmo ee Galbeed New York, qofkasta oo ku sugan Gobolka New York oo u baahan adeegyada degdega ah wuxuu helayaa daryeelka, waxaanu helayaa qiimo dhimis, haddii aanu lahayn ceymiska caafimaadka.

Waxaa intaasi soo raaca, qofkasta oo ku nool Gobolka New York wuxuu heli karaa qiimo dhimista gargaarka aan degdega ahayn, ee adeegyada daaweynta lagama maarmaan ah ee Xarumaha Daryeelka aad loogu baahan yahay ee CHS, haddii aanay lahayn ceymis caafimaad. Laguuma diiddi doono daaweynta lagama maarmaanka ah hadday sababtu tahay inaad u baahan tahay gargaar maaliyaddeed.

Waxaad soo codsan kartaa qiimo dhimista iyadoon loo eegayn meeqaamkaaga soo galeetanimo.

### **Waa maxay xuduudaha dakhliga?**

Ma jiraan xuduudo lagu xidhayo dakhligu. Dhammaan bukaannada aan lahayn ceymisku waxay xaq u yeelan doonaan qiimo dhimis ku saleysan Minqiyaaska CHS ee Dadka aan Ceymiska ku jirin iyo Barnaamijka Siyaasaddaha Gargaarka Daryeelka Caafimaad (**Health Care Assistance Program (HAP)**).

Bukaannada aan iska bixin karayn qayb kamid ah ama dhammaan masuuliyaddaha maaliyaddeed waxay xaq u leeyihiin qorshayaasha muddada gaaban ama dheer ee wax bixinta. Xadiga aad bixinaysaa wuxuu ku xidhan yahay xadiga dakhligaaga.

Bukaannada xaq u leh gargaarka maaliyaddeed masuul kama noqonayaan maaliyad ka badan xadiga qiimo dhimista daryeelka caafimaad.

Bukaanka wax lala bixinayo ama baaqiga bixinayaa wuxuu xaq u leeyahay qiimo dhimis waafaqsan barnaamijka Gargaarka Daryeelka Caafimaadka.

**Qof ma igu caawin karaa inuu ii sharaxo Barnaamijka? Qof ma iga caawin karaa codsiga?**

## **Nidaamka Catholic Health – Siyaasadda Xarumaha Daryeelka aad loogu Baahan yahay ee Gargaarka Daryeelka Caafimaadka**

Haa, waxaad helaysaa caawin bilaash ah oo sirteedu xafidan tahay. Soo wac qaybta maaliyadda 601-3600

La taliyaha ayaa kuu sheegi kara haddii aad xaq u leedahay ceymis bilaash ah ama qiimahiisu hooseeyo, sida Gargaarka caafimaad (Medicaid), Caafimaadka Caruurta (Child Health Plus) ama Caafimaadka Qoyska (Family Health Plus).

Haddii aanad ceymis ku jirin oo aad daryeel uga baahan tahay xarunta daryeelka aad loogu baahan yahay ee CHS, karaaniga diiwaangelinta ayaa ka caawin doona codsiga gargaarka wakhtiga diiwaangelinta. Waxaa kale oo aad soo codsadaan kartaa kadib adigoo la soo xidhiidhaya Qaybta Maaliyada 601-3600.

Haddii aanad ku hadal luuqada Ingiriisida, qof kale ayaa kugu caawin kara luuqadaada.

### **Suuqa Daryeelka Caafimaadka**

Xeerka Daryeelka Jaban (ACA) wuxuu dhigayaa in qofkasta oo si sharci ah ugu nool Maraykanku inuu lahaado ceymiska caafimaadka laga bilaabo Jeenaweri 1, 2014. Waxaanu sidoo kale siinayaa dad aan ceymis helin ama ay yar tahay inay ceymis helaan qorshayaal caafimaad ee heerka qiimahoodu kala duwan yahay. Xeerkan wuxuu sidoo kale siinayaa gargaar caafimaad dadka xaq u leh iyadoo la eegayo tirada qoyska iyo dakhliga. Laga bilaabo Oktoober 2013-kii waxaad awood u lahayd inaad ka tukaameysato Suuqa Caafimaadka ee Internet-ka, oo sidoo kale loo yaqaan Sarifka Ceymiska Caafimaadka, kaasi oo aad si dhakhso uga iibsan karto qorshe ku haboon miisaaniyaddaada iyo buuxinta baahiyahaaga. Codsiga waxaa la furaa Noofember si laysku diiwaangeliyo Sarifka Daryeelka Caafimaadka.